

U Diyaarinta Ilmahaaga Naafada ah Barashada Fogaanta

(Preparing Your Child with Disabilities for Distance Learning - Somali translation)

Diyaargarowga lagu taageerayo ilmahaaga naafada ah ee barashada fogaanta waxay umuqataa haatan mid xad dhaaf ah. Halkan waxaa ku yaal qaar ka mid ah tilmaamaha kaa caawinaya adiga iyo ilmahaaga sidii aad ugu gudbi lahayd jawigan waxbarasho ee cusub.

Hadaad ubaahantahay qalab dheeri ah ama adeegyo (tusaale ahaan, ma lihid adeeg internet lagu kalsoonaan karo), laxiriir maamulaha kiiskaaga barnaamijka waxbarashada shaqsiyadeed (IEP) ama iskuduwaha 504 oo koobi fariintada ah ku lifaaq agaasimaha waxbarashada degmadaada ee waxbarashada gaarka ah si aad u codsatid waxyaabahaan iyo adeegyo ama howlaha la xiriira adeegyada. Haduu iskuulku isticmaalayo buqshado ku jira howsha ardeyda laga filayo, waxaad ubaahnaan karta inaad codsoto aalad ama qalab gacan ka siisa dhameystirka shaqada.

- √ Hubso in adiga iyo cunugaaguba aad fahamtaan sida loo isticmaalo aaladda ama baakadaha shaqada iyo astaamaha barashada.
 - Astaamaha aaladda lagu fahmo waxaa ka mid noqon kara:
 - Qoraal kor ugu akhri cunuggaaga (qoraal-ila-hadal)
 - Waqti qabad si aad u xasuusiso cunugaaga inuu diirada saaro
 - Go'aaminta qoraallada iyo jawaabaha aaladda
 - Kalandarka iyo qabanqaabiyaasha shaqada guriga
 - Weydiinta su'aalo ama kaqeybgal kale inta lagu jiro tilmaamaha
 - Diiwaangelinta tilmaamaha haddii ay dhacdo in adiga ama cunuggaagu u baahdaan inaad fiirisaan macluumaadka
 - Xusuusin qaadashada inta lagu jiro fasalka ama inta aad wax akhrinayso
 - Xarig qoraal ah oo xiran
- √ Samee liis ah meelaynta cunuggaaga oo u dir macallin kasta emayl weydiinaya sida loo siin doono ama hagitaan ku saabsan sida aad uga caawin karto bixinta xarumahan, iyo sidoo kale qaabab kale oo aad ku taageeri karto u guuritaanka cunuggaaga qaab-waxbarashadan. Haddii ay munaasib tahay, waad ku aqbali kartaa inaad bixiso fududeyn ama wax ka beddelid cusub.
- √ Weydii macallimiinta ama maamulayaasha kiisaska sida ugu wanaagsan ee lagula xiriiri karo (emayl, taleefan, iwm) iyo saacadaha la heli karo.
- √ U dir cinwaanka emaylka maamulaha adiga oo weydiinaya cidda lala xiriirayo haddii aad la kulanto dhibaato farsamo ama aad u baahan tahay taageero farsamo.

U qorshee aag waxlagu barto

- √ U hel goob deggan oo aan buuq leheyn ee guriga.
- √ Goobta miis yar oo meel wax lagu keydsado leh (sida qalmaanta iyo waraaqaha) u dhig.
- √ Sii wax aad kumbuyuutarka dul saarto haddii ilmahaagu doorbido inuu istaago (sanduuq adag oo u ku istaago u dhig).
- √ Sii kursi (mid u saamaxaya dhaqdhaqaaqa ayaa ka caawin kara foojignaanta).

- √ Ugu nidaami aagga waxbarashada, baakadaha shaqada waraaqaha lagu keydsado, sahayda kale, iyo buugaagta qoraalka.
- √ Sii dhalo dhalo biyo ah, iyo xanjo ama cunto fudud oo ka caawiso foojignaanta.
- √ Wax kasta oo la xiriira maclumaadka dugsiga waa in lagu hayaa aaggan oo aan lagu hayn guriga intiisa kale.
- √ Ku caawi cunuggaaga inuu sameeyo jadwal maalmeed ah (waqtiga fasalka, qadada, iwm.).
- √ Ka caawi inay dejistan qalabka dhawaaqa digniinta taleefanka ama qalabka kale si ay u xasuusiyan.

Waqtiga barashada kahor

- √ Samee xarakaad maalmeed ah: ka dhig inay maalin walba tosaan oo sariirta aadaan waqti isku mid ah maalin kasta.
- √ Xarakaad maalmeedka sida qubeyska, lebiska, iyo waqtiga wax-cunidda oo maalinwalba isku waqti ah waxey ka saacideysa iney waxbarashada u diyaargroban.

Waqtiga waxbarashada

- √ Marwalba hubi in aad so eegto, oo ka caawi inay waxbarashada u foojigan yihiin.
- √ Hubi ilmahaaga in ay waqti nasasha ah qataan maalinta oo dhan, oo ay guriga dhexdiisa ku soconayan shan ill'aa tobon daqiiqadood.

Waxbarashada kadib

- √ U oggolow cunugaagu inuu sii wato shaqada guriga ee isla meeshii ay ku sameeyeen intii ay dhiganayeen iskuul shaqsiga ah.
- √ Aaladaha waxarashada loo isticmaalo ku soo celi dhammaan sahayda shaqada-guriga ee loo qoondeeyay aagga waxbarashadda ka dib.
- √ Xir oo demi qalabka aaladda si aad uga fogaato si xun u isticmaalka iyo jabsiga kaameradda ama makarafoonka.
- √ U dir emayl cinwaanka macallinka iyo maamulaha kayska — wac ama qoraal haddii ay doorbidaan — wixii ku saabsan wixii dhib ah ee ilmahaagu kala kulantay shaqaguriga ama shaqada fasalka waxbarashadooda.
 - Fadlan emayllada, qoraalada, iyo wicitaanada xadid. Isku day inaad ku xadido hal qoraal malin walba maalintiiba.
 - Isu diyaari adoo sameya liistada waxyaabaha aad ka walwalsantahay, kahor intaadan la xiriirin macalinka.

Dulqaad yeelo oo xusuusnow tani waa jawi waxbarasho oo ku cusub macallimiinta iyo sidoo kale ardayda iyo waalidiinta.

Akhbaaro siyaada ah, la xiriir Hey;adda Xarunta PACER (952) 838-9000 ama PACER@PACER.org.